



Tilmaamaha Maalgalinta 2020 ee Arts in Parks (AIP) Program

Office of Arts & Culture (Xafiiska Farshaxanka iyo Dhaqanka) wuxuu la kaashanayaa Seattle Parks and Recreation (Darjiimada Seattle iyo Madadaalada) si loogu kordhiyo farshaxanka iyo dhacdooyinka bulshada ee darjiimada oo magaalada oo dhan ah. **Arts in Parks Program (AIP, Barnaamijka Farshaxanka Beeraha Nasadhada)** waa fursad magaalada ay maalgelineyso shaqada dhaqanka ee lagu sameeyay gudaha iyo bulshooyinka kala duwan oo dhinaca Seattle.

Macluumaadka: Laxariir Jenny Crooks, Maareeyaha Mashruuca adoo kawacaaya (206) 684-7084,

jenny.crooks@seattle.gov

TTY: 711 or (800) 833-6384, Tele-Braille: (800) 833-6385.

Codsiga	Waqtiga ugu danbeeya
Waxaa laga heli karaa https://seattle.gosmart.org/	Tallaado, Oktoobar 22, 2019, 11 p.m. PST
Aqoon isweedaarsiyada: Tallaado, Agoosto 27 ^{deeda} 5:30-7:00pm Southwest Branch Library 9010 35th Ave SW, Seattle, WA 98126 RSVP Halkaan	Sabtida, Sibteembar 28 ^{deeda} 11:00am-12:30pm Lake City Branch Library 12501 28 th Ave NE, Seattle, WA 98125 RSVP Halkaan
Khumiista, Sibteembar 5 ^{teeda} 5:30-7:00pm Art @ King Street Station 303 S Jackson St, Seattle, WA 98104 RSVP Halkaan	Sabtida, Octoobar 5teeda 11:00am-12:30pm Rainier Beach Community Center 8825 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118 RSVP Halkaan
Cida uqalanta Farshaxanada shaqsigaa ah, gollaha farshaxanka xaafadaha iyo kooxda bulshada deegaanka ku saleysan way u qalmaan. Mashaariicda la soo jeediyay waa in lagusoo bandhigaa jardiino uqalanta goobaha ay astaysay City of Seattle pinta udhaxaysa Abriil 1 iyo Nufeembar 30, 2020	
Maalgelinta Codsadayaasha u qalma waxay codsan karaan maalgalin hal sano ah oo dhan illaa \$7,800 si loo taageero qarashaadka mashaariicda tooska ah ee sanadka 2020.	

Dulmarka Barnaamijka

Barnaamijkaan wuxuu taageeraa gollaha farshaxanka xaafada, kooxyada bulshada ku saleysan, iyo farshaxanka shaqsi ah ee raadinayo inuu daaro Seattle Parks ee [uqalmo](#) aagaga tabaaleysan oo dhaqaala ahaan liita ee kamidka ah magaalada. Barnaamijkaan wuxuu taageeraa feestooyinka cusub oo nidaamsan ama dhacdooyinka sare u qaado farshaxanka iyo ka qeybgalka dhaqanka, udabaaldagaaya isdhexgalka bulshooyinka kaladuwan, dhisaaya iskuxirnaanta bulshada, kana shaqaysiinaaya beeraha lagu nasto ayadoo kor looqaadaayo farshaxanka iyo dhaqanka halka layskuxiraayo bulshooyinka tabaalaysan ayna kujiraan kuwa danyarta ah, dadka naafada ah, bulshooyinka qaxootiga ah, iyo bulshooyinka midabka (aan cadaanka ahayn).

Ujeedada Barnaamijka

Nashaadaadka dhaqanka iyo jardiinooyinku waa qayb muhiim u ah bulsho firfircoon, caafimaad qabta oo iskudhafan. Shaqada Seattle Parks and Recreation waxay siisaa soo dhaweyn iyo fursado badbaado ah ee lagu ciyaaro, lagu barto, ku fakaro, iyo dhiso bulsho, iyo ayna sare u qaado masuuliyada wakiilnimada dhulka. Asagoo kaashanaaya Seattle Parks and Recreation, Office of Arts & Culture wuxuu iskaashi lasamaynayaa kooxaha farshaxanka iyo bulshada si aan u abuurno magaalo dhamaan farshaxaniistayaasha iyo bulshooyinku ay haystaan xoriyad, wakaalad iyo nidaam ay kula wadaagaan dadka ayna kusoo bandhigaan sheegooyinkooda, farshaxankooda, dhaqanadooda iyo khibradahooda, ayadoon laga eegayn isir, dabaqad, jinsi, da'da, awood, waxbarasho, wadanka ay udhasheen, muwaadinimo, diin ama dookhooda galmada. Hay'adaha, kooxaha iyo shaqsiyaadka farshaxanada matalaaya bulshooyinka tabaalaysan oo ay ku jiraan kuwa daqligoodu hooseeyo, bulshooyinka soogalootiga ah iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midibka waxaa lagu dhiirogelinayaa inay codsadaan.

Cida uqalanta iyo Sharuudaha

Codsadaha waa inuu:

- ahaadaa farshaxan shaqsi ah, gollaha farshaxanka xaafadaha ama kooxda bulshada deegaanka ku saleysan. Hay'adaha iyo shaqsiyaadka farshaxanada matalaaya bulshooyinka tabaalaysan ah oo ay ku jiraan kuwa daqligoodu hooseeyo, dadka naafada ah, bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midibka waxaa lagu dhiirogelinayaa inay codsadaan.
- waa in uleeyahay lambarka Aqoonsiga Cabshuurta Faderaalka iyo ayna ku saleysnaato caasimada Seattle. Kooxyada codsanayo looma baahno inay ahaadaan 501(c)(3) faa'ido la'aanta ama aan looga baahneyn inay isticmaalaan wakiilka maaliyada;

Mashruucu waa inuu:

- lahaadaa farshaxan iyo qeybaha dhaqanka ku filan,
- xor u ahaadaa bulshadana u furnaadaa,
- caymis lahaadaa,
- siiyaa qaab ay farshaxaniistayaasha qoomiyadaha tabaalaysan kasoo jeeda iyo bulshooyinkoodu xirfadooda kumuujiyaan,
- uu waafaqaa halkudhiga shaqo ee Seattle Park and Recreation (Waaxda Beeraha Lagu nasto iyo Goobaha Nasiinada) (kafiiri **Ujeedada Barnaamijka** ee kor kuqoran),
- iyo ka qaado jardiino uqalma oo kuyaala Seattle ee u dhaxeeyo Abriil iyo Nufeembar 2020.
 - *(fiiri liiska ku lifaaqsan ee darjiimada la doorbiday ee bogga 7).*

- Dhacdooyinka ka dhacayo Magaalada hoose ama Darjiimada Xarunta Caasimada ama Garoonka ciyaaraha iyo boosaska cagaarka ah isla markiiba sida ku dhow xarumaha bulshada **uma** qalanto maalgelintaan. Fadlan fiiri liiskan ee darjiimada aan loo qalmin ee bogga 8-9.

Waxaad gudbin kartaa kaliya hal codsi sannadkiiba barnaamijkaan. Codsadayaasha u qalmo waxay gudbin karaan codsiyada mashaariicda kala duwan ee labadaba Arts in Parks (AIP) iyo [Neighborhood & Community Arts \(NCA, Xafiiska Farshaxanka iyo Dhaqanka Bulshada\)](#) hadiibo uu mushaariixda buuxiyaan jaheynta la xiriirto u qalmida. Haddii mushruuc kaliya u qalmo labadaba maalgelinta AIP iyo NCA codsiga waxaa lagu gudbin karaa labada barnaamij laakin waxaa kaliya oo ay ka helayaan maalgelinta labadooda midkood.

Maalgelinta

Hay'adaha la maalgeliyay waxay helayaan hal (1) sanno ee taageerada maalgelinta AIP (ee dhacdooyinka 2020) aado dhinacyada: qidmooyinka farshaxanka, qidmooyinka suuqgeynta iyo dalacsiinta iyo qarashaadka gaarka ah, saadadka, qalabyada kirada ama qarashaadka alaabaha la xiriirto, shatiyada loo baahanyahay mana jiraan wax ka badan 10% oo qarashaadka cuntada la xiriirto. Maalgalinada looma adeegsan karo qarash aruurin, hadiyado, qarashaadka maamulka hay'adaha si toos ah ulama xiriirto mashruuca ama iibsiga qalab. Majirto maalgalin aan buuxin oo barnaamijkaan lagu bixinaayo. Codsadaha wuxuu u codsan karaa heerarka xiggo ee maalgelinta:

- \$1,300 (Uma baahno wax diiwaanada dabagalka ee alaabaha dhacdada.)
- \$2,600*
- \$5,200
- \$7,800**

**Kaliya kooxyada leh taariiqda muuqato ee dhacdooyinka la soo saarayo ee loo codsan karo maalgelinta heerka \$2,600 iyo ka sareeyo.*

***Dhacdooyinka/mashaariicda horay loogu maalgeliyay heerka \$7,200 ee sanadihii hore waxay kaliya oo ay quseyn kartaa kaliya \$5,200 ama ka hooseeyo, MARKII LAGA REEBO dhacdooyinka/mashaariicda bixiso ugu yaraan 12 saacadood ee barnaamijka bulshada ee ¹darjiinka u qalmo muddo ugu yaraan afar (4) maalmood ah². Xanibaadaan waxaa lagu saleeyaa jawaabta ay bulshadu bixiso iyo in lataageero abuurista mashaariic badan iyo in gacan laga gaysto dhisida awooda munaasabadaha.*

Maalgalintaan looma adeegsan karo

- munaasabadaha aan bilaashka ahayn una ufunayn bulsho wayn;
- adeegyada diinta;
- munaasabadaha ama bandhigyada ujeedadooda koobaad tahay in lacag lagu aruursho;
- hadiyadaha;
- qarashaadka maamulka hay'adaha si toos ah ulama xiriirto mashruuca;
- iibsiga qalabka ama softiweerka;
- qarashaadka la xiriirto cuntada ee kabadan cadadka la ogolyahay ee 10%.

¹ *Barnaamijka Bulshada* waxaa looga jeedaa saacadaha munaasabadaada laxayaysiinaayo oo latusaayo dadwaynaha, tusaale ahaan waqtiyada kuqoran qaybaha xayaysiinta ee gobta aad kubeegtay nashaadaadkaaga si bulshadu uga qaybgasho. Tan kuma jiraan saacadaha dajinta ama tababarka ee kahoreeya xiliga rasmiga ah ee biloowga munaasabadaada ama nashaadada.

² Tani waa xadidaad cusub oo sanadkaan laso rogay. Maalmaha munaasabada ayaa noqon kara kuwo iskuxiga ama kala go'an inta lagu jiro mudada loo asteeyay barnaamijkaan oo ah inta udhaxaysa Abriil iyo Diseembar 2020.

Sharuudaha Qiimeynta

Mashaariicda loo gudbiyay barnaamijka waxaa lagu qiimeynayaa sharuudaha soosocda (**50 dhibcood wadarta guud**):

- **Awoodaha Mashruuca (20 dhibcood):** Munaasabad qeexan, oo sifiican loosoo habeeyay taasoo kor uqaadaysa kaqaybgalka farshaxanada iyo xariirada bulshada ayadoo la adeegsanaayo khibrado macno badan oo qaas ah. Waa inuu muujiyaa xariir xiiso leh oo kaladhexeeya bulshada dhaqanka, xaafada ama maslaxada bulshada.
- **Saameynta Bulshada (20 dhibcood):** Qorshaha mashruucu waa inuu qeexayaa dadaalo macno badan leh si uu unoqdo mid iskudhafan, kobcinaaya bulshada, dhiirigalinaaya kaqaybgalka, gaaraaya dhagaystayaal kaladuwan, abuurayana helitaan fudud gaar ahaana siinaaya dadka ay saameeyeen isir takoorka iyo guumaysiga dhanka nidaamka ah.
- **Qanaacada (10 dhibcood):** Ururka barnaamijka diyaarintaaya wuxuu leeyahay diiwanka dabagalka la ansixiyay ee lagu bandhigayo midaan iyo/ama dhacdooyinka kale; iyo/ama kartida la muujiyay ee lagu soo saarayo dhacdada; cadeynta bulshada ku lugleh iyo taageerada; iyo miisaaniyada dhabta cad ah ee dhacdada.
- **Darjiimada La doorbiday:** Mudnaanta waxaa la siinayaa mashaariicda ka dhacdo hal ama kuwa badan ee darjiimanka la doorbiday ee lagu aqoonsaday liiska bogga 7, taas oo si gaar ah uga faa'ido isticmaalka lagu kordhiyay bulshada.

Qaybaha Codsiga

- **Foomka Su'aalaha laxariira Deegaanka Dadka:** Foomkaan looma tixgalinaayo inuu qayb kayahay codsigaaga laakiin wuxuu naga caawinayaa inaan wax badan ka ogaano bulshooyinka aan ushaqayno anagoo umarayna barnaamijyadeena si aan markas usiiwadno hagaajinta shaqadeena aana barnaamijyada uga dhigi lahayn kuwo sinaanta sii adkeeya. Dhamaan su'aaluhu waa ikhtiyaari, laakiin foomka su'aalo waydiinta waa in lasoo gudbiyaa kahor intaadan usii gudbin qaybaha kale ee codsiga.
- **Macluumaadka Dheeriga ah ee Naqshada:** Qaybtaan waxay bixinaysaa macluumaad dheeri ah oo dhanka xariirka ah kaasoo gaar u ah codsigaan laakiin aan horay loogu codsan naqshada diiwaangalinta.
- **Macluumaadka Codsiga:** Su'aalo kooban oo laxariira sidaan kumaqashay fursadaan.
- **Naqshada Mashruuca:** Macluumaad aasaasi ah oo laxariira munaasabadaada sida taariikhaha, goobta, xajmiga, iwm.
- **Su'aalaha Xigashada/Warinta:** Ujeedada su'aalahaan waa in aad nala wadaagto macluumaadka kusaabsan munaasabadaada/mashruucaaga, bulshada aad uqabanayso, iyo macluumaad kusaabsan shaqsiyadaada.
 1. **Sharaxaada Mashruuca:** Qeexitaan kabixi shaqooyinka dabaaldaga, munaasabada, ama mashruuca aad doonayso in maalgalin lagugu siiyo. Kudar sharaxaada macluumaad laxariira sida farshaxanka iyo dhaqanku ugasoo muuqan doono mashruucaaga ama munaasabadaada.
 2. **Kobcinta bulshada ayaa loo adeegsanaayo Farshaxanka iyo Dhaqanka:** Fadlan sharaxaad kabixi cida kaqaybgasha munaasabadaada. Sidee ayuu mashruucaagu u adeegsadaa farshaxanka iyo dhaqanka si uu bulshada ukobciyo? Sharaxaad kabixi dadaalada ku aadan in mashruucagu noqdo mid iskudhafan, lana shaqaynaaya bulshooyinka dhaqanada kaladuwan aadna ukordhinayso helitaanka adeegyadaada.

3. **Aaasaasiyaadka iyo Tayada:** Sharaxaad kooban kabixi taariikhda barnaamijkaaga farshaxanka iyo shaqooyinkaaga bandhiga. Taageero noocee ah ayaad uhaysataa cadaynta inaad tayo uleedahay abuurista munaasabadaan si guul ah? Sharaxaad kabixi iskaashato kasta oo muhiim kuu ah (ood laleedahay ururo, kooxo, ama shaqsiyaad) kuwaasoo gacan kagaysanaaya in si guul ah loodhamaystiro mashruucaan ama munaasabadaan.
- **Miisaaniyada Mashruuca:** Waa inuu qeexaa qiimaha munaasabada 2020, dhaqaalaha iyo qarashaadka baxaaya waa inay iskudheelitirmaan, sidoo kalana waxkasta oo laguugu deeqay ama adeegyo lagu siiyay ah waa inaad kusoo dartaa sharaxaada. Waxaa sidoo kale jiro boos aad kusoo dari karto sharaxaad laxariirta miisaaniyadaada.

Jadwalka waqtiga

Dhamaadka bisha Oktoobar 2019	kadibna marka lagaaro xiliga kama danbaysta ah, gole farshaxaniistayaal madax banaan ah, wakiilo kasocda bulshada, iyo munaasabado sameeyaal ayaa kaqaybgali doona tababar qoomiyaduhu usiman yihiin oo kacaagan eex.
Bisha Nufeembar	golaha dhinacyada iskudhafan wuxuu dib u eegis kusamaynayaa uuna buundooyin ukala yeelayaa codsiyada ayadoo lagu salaynaayo uqalmida barnaamijka.
Bilowga Diseembar	Golaha ayaa kulmaaya si ay uga doodaan codsi kasta si loogu qiimeeyo shuruudo barnaamijka.
Janaayo 2020	Seattle Arts Commission (Gudiga Farshaxanka ee Seattle) iyo hogaanka Seattle Parks and Recreation ayaa dib u eegis kusamayn doona soojeedinada ugu danbeysa kadibna ucodaydoona si ay u ansixiyaan.
Bilowga Feebaraayo	Codsadayaasha waxaa lagu wargalinayaa inay maalgalin heli doonaan iyo inkale.
Abriil – Nufeembar 2020	Iskaashatada ayaa samaynaaya munaasabado waxayna soo gudbinayaan dukumiintiyadooda warbixinta si ay uhelaan maalgalinta.

Buuxinta codsiga onleenka ah

- Abuuro ama waxkabadal macluumaadkaaga adoo galaaya <https://seattle.gosmart.org/>
 - Neighborhood & Community Arts iyo Arts in Parks waxay adeegsanayaan codsi iskumid ah. Raac tilmaamaha kuqoran nidaamka codsiga si ay kaaga caawiyaan nooca barnaamijyada aad codsanayso.
- Codsiga onleen ahaan kusamee adoo kajawaabaaya dhamaan su'aalaha xiliga lagu qabtay.

Wajjibaadyada Dadka abaalmarinta helaaya

Haddii mashruucaaga loo doortay maalgelinta, waa inaad buuxisaa sharuudaha hoos ku qoran.

Aqbalaad

Ururada iyo shaqsiyaadka helaaya abaalmarinada uu baxsho Office of Arts & Culture waa inay aqbalaan taageerada City of Seattle ee macluumaadka qoran, astaamaha dadku arkayaan, lagunasoo qoro baraha bulshada ama qaababka kale oo kuhaboon mashruuca. Xafiiska ayaa bixinaaya erayada ladoorto iyo astaamaha oo qaab elektaroonig ah.

Faa'iidada Dadwaynaha Ugu jirta

Sharciga gobalka ayaa sharciyaynaaya iibsiga adeegyada asagoo wakiil ka ah dadwaynaha, laakiin mafasaxaayo in lacagta dawlada lagu maalgaliyo ururo ama shaqsiyaad. Ururada iyo shaqsiyaadka maalgalinta lasiiyo waa inay faaiidooyin guud siiyaan muwaadiniinta reer Seattle taasoo ah shardi kuxiran maalgalinta.

Shatiga Ganacsiga ee Seattle iyo Nambarka Gobalka Washington ee UBI ayaa Qasab ah Si lagu siiyo Maalgalin

Shaqsiyaadka iyo ururada lasiiyo maalgalinta uu baxsho Office of Arts & Culture waa inay haystaan Shatiga Ganacsiga ee Seattle iyo Nambarka Gobalka Washington ee Unified Business Identification (UBI, Aqoonsiga Midaynta Ganacsiga) kahor intaysan helin maalgalinta. (Shatiga ganacsiga iyo nambarka UBI LOOMA baahna si aad ucodsato maalgalinada.)

Soo gudbinta

Kadib marka soo jeedinada la ansixiyo, shaqaalaha Office of Arts & Culture ayaa lashaqayn doona codsada si dulmar loogu sameeyo dukumiintiyada soo gudbinta codsiga ee qasabka ah si uu codsaduho uhelo maalgalinta. Dadka abaalmarinta hela uma baahna mardanbe inay saxiixaan heshiis kahor intaysan qaban munaasabadooda laakiin waxay ubaahan doonaan inay xaqiijiyaan macluumaadka mashruucoda kahor intaysan fulin mashruucoda ayna kujiraan taariikhaha xiliga ay qabanayaan iyo goobta ay kuqabanayaan si bulshada loogusoo bandhigo iyo inay sidoo kale keenaan koobiga alaabaha xayyiisinta ah. Iskaashatada waxaa lasiinayaa lacag celis ah kadib markay mashaariicda ama adeegyadu dhamaadaan warbixinta kama danbaysta ahna lasoo gudbiyo (kudhawaad 4-6 asbuuc kadib markay dukumiintiga soo gudbiyaan.)

Caymiska

Helayaasha abaalmarinta ayaa masuul ka noqonayo illaalinta Caymiska Masuuliyada Dhacdada mashruucoda iyo qorista Magaalada Seattle oo ah caymis bixiye dheeri ah.

Canshuuraha

Helayaasha abaalmarinta ayaa masuul ka ah bixinta dhammaan canshuuraha quseeyo. Waqtiga ogaysiiska, waxaad u baahaneysaa inaad buuxisid waraaqaha shaqada ku haboon iyo foomka cusub ee W-9.

Tilmaamaha Codsiga Dhamaan barnaamijyada maalgalinta waa kuwo aad loogu tartamaayo. Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad:

- **akhrido timaamaha**, aad hubiso uqalmidaada, aadna raacdo tilmaamaha oonleenka ah si taxadar leh.
- **aragto codsiga oonleenka ah xili hore** si aad usii qorshaysato.
- **aad kaqaybgasho kulanka macluumaadka** si aad uhesho tilmaan toos ah aadna umaqasho su'aalaha codsadaayaasha kale, gaar ahaana haday tahay markii koobaad ood codsiga dirsato.
- **cusbooneysii ama buuxi diiwaankaaga aasaaska** iyo bogga <https://seattle.gosmart.org/>.

- **kala hadal maareeyaha mashruuca** su'aalo kasta ood qabto, ama si uu ufiirsho codsigaaga xili hore oo macquul ah kahor intaan lagaarin waqtiga kama danbaaysta ah. Waan ku faraxsannahay inaan kugu caawiyo, laakin caawinta daqiiqada ugu dambeyso waxay ku xadidantahay waqtiga, iyo xajmiga codsiyada.
- **ha ahaado codsigaaga mid qeexan oo isku dheeli tiran** - gudiga turxaan bixintu waxay akhriyaan codsiyo badan.
- **markasta kaydi**, kayso shaqadaada markaad dhamayso bogga ugu danbeeya ee oonleenka ah, kadibna xaqiiji inaad dib u akhrido aadna dulmarto shaqadaada kahor intaadan gudbin.
- **labo jeer hubi miisaaniyadaada** oo hubi in dakhligu u dhigmo qarashaadka.
- **gudbi codsigaaga kahor intaan mudada looqabtay dhamaan** si aad markaas waqti ugu hesho xalinta caqabadaha dhanka farsamo ee imaan kara.

Jardiinooyinka uqalma ee ladoortay

QOR DARJIIMADA AY DOORBIDAAN

Fadlan booqo Darjiimada Seattle [webseetka](#) iyo isticmaal Park Finder (Helaha Darjiinka) si aad u eegtid warbixin badan ee ku saabsan darjiimo walba oo ku qoran.

BARTAMAHA

- Dr. Blanche Lavizzo Park
- First Hill Park
- Judkins Park
- Flo Ware Park
- Pratt Park
- Powell Barnett Park

WUQOYIGA

- Albert Davis Park
- Ballard Commons Park
- Lake City Mini-Park
- Mineral Springs Park
- Salmon Bay Park
- University Playfield

KOONFUR-BARI

- Beer Sheva Park
- John C. Little Park
- Martha Washington Park
- Othello Park
- Pritchard Island Beach

GALBEEDKA KOONFUR

- Duwamish Waterway Park
- Highland Park Playground
- Myrtle Reservoir Park

- Roxhill Park
- Westcrest Park

QOR DARJIIMADA AAN U QALMIN

Magaalada hoose ama darjiimada Bartamaha Caasimada UMA qalmaan mashaariicda maalgalinta kahelaaya Arts in Parks. Illaha maalgelinada kale waxaa loo heli karaa mashaariicda darjiimadaan.

2100 Westlake
Alaskan Way Blvd
Bell Street BLVD
Belltown P-Patch
Cascade Playground
City Hall Park
Denny Regrade OLA
Donnie Chin International Children's Park
Elliott Bay Bike Path
Freeway Park
Hing Hay Park
Kobe Terrace
McGraw Square
Myrtle Edwards
Occidental Square
Pier 62/63
Pioneer Square Park
Plymouth Pillars Park and Off Leash Area
Prefontaine Place
South Lake Union
Tilikum Place
Union Station Square
Victor Steinbrueck
Waterfront Park
Washington Street Boat Landing
Westlake Square
Westlake Park

Garoomaha, Jardiinada, iyo boosaska cagaarka UMA qalmaan mashaariixda Arts in Parks (Jardiinooyinka farshaxanka) ee lamaalgalinaayo. Qaar badan oo kamid ah garoomadaan ciyaaraha iyo jardiinooyinkaan ayaa kafaaiidaysta Xarumaha Bulshada kuwaasoo leh ilo maalgalined ama ilo kale oo taageero lagu siiyo mashriicda jardiinooyinkaan.

Alki Playground
Ballard Playground
Bitter Lake Playfield
Camp Long
Carkeek Park
Delridge Playfield
Discovery Park
Garfield Playfield
Green Lake Playfield

Hiawatha Playfield
Laurelhurst Playfield
Loyal Heights Playfield
Magnolia Playfield
Magnuson Park
Meadowbrook Playfield
Miller Playfield
Montlake Playfield
Northgate Park
Rainier Beach Playfield
Rainier Playfield
Ravenna-Eckstein Park
South Park Playground
Van Asselt Playground
Walt Hundley Playfield
West Queen Anne Playfield
Yesler Terrace Park

Xeerarka Maalgelinta FANKA

Balanqaadka Sinnaanka Jinsiga

Seattle Office of Arts & Culture waxaa ka go'an dhaqanka shaqada cunsuriyada kasoo horjeedo ee dhexdhaxaadiso hal abuurka iyo hogaanimada dadka midibka - kuwa ay aadka u saameysay cunsuriyada qaabeysan - nidaamka horay u socdo ee aan dhammaanteen ka faa'iidno. Waxaan sidoo kale qirsannahay in aan nahay dhul asal ahaan, dhulka dhaqanka ee dadka Xeebta Salish.

Waxaan qiyaasnay caasimada dadka ee guusheeda, badbaadadeeda iyo caafimaadka aan horay loogu go'aansan jinsigooda. Caasimada halka dhammaan farshaxanada, bandhigayaasha, qoraayaasha iyo shaqaalaha hal abuurka ay leeyihiin xoriyada, hay'ada iyo xeerka lala wadaagayo iyo lagu xoojinayo sheekooyinkooda, fanka, dhaqanka iyo waaya aragnimada. Isla waqtigaas, waan ogsoonahay in tallaabooyinkeena - labadaba og iyo aan ogeyn, la soo dhaafay ama la joogo - way ka faa'ideen qaar ka mid ah bulshooyinka iyada oo la xadeynayo fursadaha bulshooyinka midibka. Waxaan ka shaqeynaa dhinaca hamiladeena iyada oo la sheegayo iyo laga shaqeynayo baabi'inta cunsuriyada qaabeysan ee barnaamijyadeena, xeerarka iyo dhaqamada.

Sida ay ku diyaarsantahay Barnaamijka [Race and Social Justice Initiative \(Cadaalada Isirka iyo Bulshada\)](#), waxaan raadineynaa xalal cusub ee u isticmaalaa farshaxanada sida xeelada lagu kaxeynaayo ma ahan kaliya xafiiskeena, laakin Caasimada sida guud ahaan dhinaca sinnaanta jinsiyada iyo cadaalada bulshada. Waxaan joogteyneynaa inaan jabino xadeynada oo aan dhisno qalabyada farshaxanka la isku dhafo ee ka hortaga arimaha jiray, oo noo riixo dhinaca bulsho lagu daray ee aan qiyaasnay.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ee ku saabsan balanqaadkeena, ama aad jeclaan laheyd inaad wax badan ka ogaatid shaqada aan sameyneyno, fadlan naga soo wac 206.684.7171 ama i-meel nooga soo dir Arts.Culture@Seattle.gov.

Qoraalada codsiga waa warbixin bulsho ah

Qoraalada codsiga ee loo gudbiyay Office of Arts & Culture wuxuu noqdaa warbixinta bulshada. Xubnaha bulshada waxay codsan karaan koobigooda ee ay la jirto codsi rasmi ah. Qoraalada waxay quseeyaan siideynta

bulshada sabab la xiriirta Washington State Public Disclosure Act (Xeerka Faafinta Macluumaadka Dadwaynaha Gobalka Washington) (PDA:RCW 42.17,). Si aad u codsatid koobiga xeerka, kala xiriir State of Washington Code Revisers' Office (Xafiiska Muraajaceeyaha Xeerka Gobalka Washington) oo kuyaala Olympia kana wac (360) 786-6777.

Takoorida laguma ogolo aaga mashaariicda Caasimada maalgelisay

Codsadaha ka helayo maalgelinta Office of Arts & Culture waa inuu u hogaansamaa Seattle Municipal Code (Xeerka Degmada Seattle) Qodobka 20.44, kuna saabsan ka hortaga takoorida heshiisyada Caasimada, iyo Cutubka 5.44, oo ku saabsan sharuudaha shatiga. Qoraalka buuxo ee xeerarka Caasimadaan waxaa laga heli karaa xafiiska Karaaniga Caasimada iyo Maktabada Bulshada Seattle.

Americans with Disabilities Act wuxuu quseeyaa mashaariicda Magaalada lagu maalgeliyay

Americans with Disabilities Act (ADA, Xeerka Ameerikaanka Curyaanka ah) waa sharciga faderaalka ee hubinayo gelitaanka adeegyada iyo xarumaha ee dadka curyaanka ah. Office of Arts & Culture waxay ixtiraamaan baahiyada dadka leh kartiyada kala duwan oo raadiyaa inay u diyaariyaan codsadhaha, ka qeybqaataha iyo dhammaan dadka daneynaayo warbixinta la xiriirto qodobada Americans with Disabilities Act iyo quseyntooda howlaha hay'adeena. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan kulamada bulshada, helitaanka iyo gargaarka maqalka, fadlan la xiriir Office of Arts & Culture ee (206) 684-7171 (codka), ama (800) 833-6388 (Xiriirinta TDD). Hay'adaan waxay u hogaan santahay dhammaan sharciyada faderaalka, gobolka iyo deegaanka waxayna kahortagtaa takoorida shaqada iyo adeegyada.

Taageertaa xoriyada hadalka

Caasimada waxay aaminsantahay bulshada kobcisa xoriyada hadalka iyo sikasta waxay sameenaysaa hormar bulsho. Farshaxanka wuxuu ka ciyaaraa door muhiim ah oo lagu muujinayo caqabada walaacyada bulshada ee maalinlaha ah. Kartida Mareykanka sida qaran wuxuu ku haraa dulqaadkooda ee fikrada kala duwan iyo akraaha. Taageerada dowlada ee farshaxanka waa inuu sidoo kale ugu dulqaataa baaxada afkaaraha oo ku dhiirogeli xoriyada afkaaraha.

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan fursadhaha iyo Office of Arts & Culture, booqo bogeena oo ah www.seattle.gov/arts, halkaasoo aad iskadiiwaangalin karto helitaanka waraaqda wararka oonleenka ah ee joogtada ah.